

# Waxad ogolaataan in aad saamayn ka qaadataan doodda iyo jilitaanka soo socda!

In aad isticmaasho jilitaan ama aad u dooddo fikrad aanad qabin, waxa ay kicin kartaa afkaar iyo aragtiyo cusub. Uma baahnid in aad weligaa hore u jishay riwaayad. Ma aha riwaayadda waxa muhiimka ahi, ee waxay noqon kartaa hab aad ku itixaanto afkaartaada iyo aragtiyo-haaga gaarka ah.

## DOOD

Ku qor mawaaqifta soo socota warqado tiradoodu dhantahay inta qof ee aad casharka ku joogtaan. Nus ahaan ku qor, koox A, nuska kalena Koox B.

Kooxda A - Waxa aad cuntaan qaadka, waxaanad rabtaan in aad si kasta u difaacdaan xaq aad u leedihiin sii wadiidiisa.

Kooxda B - Waxa aad u aragtaan in qaadku si walba mamnooc uga ahaado Iswiidhan.

Sii xula qof hoggaamiya doodda oo labada kooxoodba u sii diyaariya su'aalaha ka dhalanaya aragtiyahaas. Isku laaba warqadaha yaryar, isku dhex qasa, qof walibana ha qaato warqad. Markaa koox waliba gaar ha u baxdo, soona diyaariya xujooyinka taageeraya mawaaqiftiina. Isku daya in aad si dhab ah u dhexgashaan fikraddaas xii-taa haddii aydaan qabin. Ku diyaargaroooba 5-10 daqiiqo gudahood. Markaas labada kooxood isa soo horfadhiisiya. Hoggaamiyaha doodda ayaa furaya doodda. Waa muhiim in qof waliba sheego aragtidiisa. Nasiib wanaagsan!

## JILID 1

Maxamed aabihii iyo hooyadii waxa la soo xiriiray xafiiska adeegga bulshada (socialtjänsten) markii wiilkooda 15 jirka ah lagu arkay magaalada isaga oo sarkhaansan. Aabihii wuu xanaaqay, oo wuxu yiri wiilku dib ulama kulmayo asxaabtiisa, qoyskana ceeb ayuu ku yahay. Maxamed wuu xanaaqay oo wuxu ugu jawaabay aabihii: "Ma adigaaga habeenkii oo dhan soo jeeda ee qayila ayaa sidaas iila hadlaya." Maxamed hooyadiina waxa ay ku xanaaqaysaa Maxamed iyo ninkeeda labadaba. Ma doonayso in uu Maxamed khamriga cabbo, laakiin waxa ay sidoo kale ku daashay in ninkeedu aanu gurigaba joogin waxyar mooyaane, maxaa yeelay waxa uu ku maqanyahay asxaabtiisa oo uu la soo qayilo. Waxa intaas dheer dhibaato dhaqaale oo ka dhalatay in ay lacag badani ku baxdo qaadka.

Isu qaybiya kooxo ka kooban saddex saddex. Kala qaybsada xilalka, si midkiin u noqdo, hooyo, midna aabe midna Maxamed. Is ku diyaar gareeya dhawr daqiiqo, dabadeedna riwaayad ugu jila kooxaha kale masraxa. Idinku go'aansada sida ay xaaladdu ku dhammaanayso. Marka dambe ka dooda wixii dhacay.

## JILID 2

"A" wuxu helay shaqo, mudda dheer oo bilaa shaqo ahayd ka dib. Isaga iyo xaaskiisu waxay aad ugu murmi jireen in uu wax badan soo jeedo habeenadii si uu ula soo kulmo asxaabtiisa oo uu ula soo qayilo. Hadda waxa uu go'aansaday in uu joojiyo qaadka. Fiidka waxa uu la kulmi doonaa asxaabtiisa oo uu uga warrami doonaa warkan xiisaha leh ee ah in uu shaqo helay. Waa ay ku farxayaan oo waxay oranayaan, waa in aynu u dabaa-degno arrinkaas. Waxa ay cabbayaan shaah, waxaanay rabaan in ay "A" ku casuumaan qaad. Maxaa dhacaya? Midkiin ayaa dooranaya in uu noqdp "A", kuwiina kalena waxa aad noqonaysaan asxaabtiisa. Qof waliba ha ka fekeru xujada iyo fikradaha uu soo jeedinayo haddii uu yahay saaxiib ama haddii uu yahay "A". Dhawr daqiiqo isku diyaar gareeya, dabadeedna riwaayad ku jila masraxa, go'aanna ka gaadha habka uu masraxu u dhammaanayo. Haddii aad badantihiin isu kala qaybiya laba kooxood oo yaryar, oo idinku isu jila riwaayadda. Dabadeedna ka dooda wixii dhacay.

